

Isticmaalka ugu haboon ee daawooyinka

1.2.2022

Qoraal kooban oo hagiis ah oo ku saabsan is daaweynta ammaanka leh

Macluumaadka daawada ku saabsan waxaa uu ku qoran yahay baakadda daawadu ku jirto, iyo warqadda la socota ee ka hadlaysa qaabka daawada loo isticmaalaayo iyo waxa ay ka samaysan tahay.

Warqaddaas waa tilmaanbixin, waxaana ay ku dhex jirtaa baakadda daawada.

Arrimaha daawada la xiriira waxaad mar walba weydiin kartaa dhakhtarka, kalkaalisada iyo farmashiyaha.

Imisa nooc oo daawo ah ayaa jira?

Noocyada kala duwan ee daawada waxaa ka mid ah, tusaale ahaan kiniinyo, goojooyin iyo kareemada jirka.

Daawo walbaa waxaa ay wadataa ama la xiriira arrimo muhiim ah, oo ay tahay in mudnaan gaar ah la siiyo marka la isticmaalaayo daawadaas.

Kahor inta aadan isticmaalin daawada, mar walba waxaad ka hubisaa warqadda la socota daawada ee baakadka ku jirta, arrimaha la xiriira sida daawada loo isticmaalaayo.

Sidee ayaan u qaadanayaa daawada?

Qaado daawada waqtiga saxda ah.

Weydii dhakhtarka, kalkaalisada ama farmashiyaha, ma in aad daawadaada qadaataa waqti go'an oo ka mid ah afar iyo labaatanka saacadood.

Dawadaada ku qaado taagni ama fadhi.

Daawada waqtiga/tiro go'an la isticmaalo (lääkekuuri)

waxaa loola jeedaa, in daawada la qaadanaayo muddo gaaban.

Daawada joogtada ah (säännöllinen lääkitys) waxaa loola jeedaa, in daawada loo qaadanaayo si joogto ah oo waqti uu u dhexeeyo, caadi ahaan maalin walba.

Daawada la qaato marka loo baahdo waxaa la qaadanayaa oo kaliya, marka ay jiraan astaamaha qaarkood.

Daawadayda ma kala jabin karaa, mase burburin karaa?

Kiniiniga waa la kala jabin karaa, haddii uu dhexda ku leeyahay xariiq kala qaybinaysa.

Kiniiniga kaabsalka ah caadi ahaan lama kala jabin karo, lamana burburin karo.

Maxaan samaynaayaa, haddaan illaawo inaan daawadayda qaato?

Haddii aad illoowday inaad daawadaada qaadato waqtigii saxda ahaa, ama aad soo mantagtay (hunqaacday), waxaad tilmaanbixinta arrinkaan ku saabsan ka hubisaa warqadda warbixinta ee baakadka ku jirta.

Waxaad kaloo talosiin weydiin kartaa dhakhtarka, kalkaalisada ama farmashiyaha.

Maxaan samaynaayaa, haddii aan qaato daawo aad u badan?

Haddii aad qaadato daawo aad u badan, waxaad tilmaanbixinta arrinkaan ku saabsan ka hubisaa warqadda warbixinta ee baakadka ku jirta.

Waxaad kaloo talosiin weydiin kartaa dhakhtarka, kalkaalisada, farmashiyaha ama Xarunta macluumaadka sumoobidda

Telefoonka Xarunta macluumaadka sumoobidda waa:

0800 147 111 (wicitaanka telefoonkaan waa bilaash ama lacag la'aan) Xarunta macluumaadka sumoobidda mar walba waa ay furan tahay.

Waligaa ha qaadan daawo loo qoray qof kale.

Ha siin dadka kale, daawada uu adiga dhakhtarku kuu qoray.

Sidee ayuu liiska daawada ii caawinayaa?

Liiska daawada waa mid marwalba wakhtiga la socda, kaasoo laga helaayo liiska dhammaanba daawada aad isticmaasho.

Liiska daawada waxaa ku qoran

- daawooyinka uu dhakhtarku soo qoray
- daawooyinka is daryeelista ee farmashiyaha laga soo iibsado, iyadoo aanay u baahnayn warqadda dhakhtarka
- liiska nafaqada ama raashinka
- Tallaallada
- Maadada daawada ee xasaasiyadda aad ku leedahay

Waxaad liiska daawada ku qortaa magaca daawo kasta ee aad qaadato, inta aad ka qaadato daawadaas iyo ujeedada aad u qaadanayso daawadaas.

Waa in aad had iyo goor wadataa liiska daawada.

Waxaadna tustaa dadka xirfadlayaasha caafimaadka ah, marka aad danahaaga ka dhammaysanayso farmashiyaha iyo xarumaha daryeelka caafimaadka.

Sidee ayaan ula soconayaa in aan daryeelkayga daawada ku guulaystay iyo inkale?

Waa arrin waanagsan in aad adiga laftigaaga la socoto, sida daryeelka daawada loogu guulaystay.

Weydii dhakhtarkaaga, waxyeellada ama saamaynta aan fiicnayn ee ka dhalan karta daryeelka daawo ee laguugu talaggalay.

Haddii daawada ay ku caawin weyso, waxyeello ama saamayn xun ay kaa soo gaadho, amaba dhibaato ay kaa haysato isticmaalka daawada, waxaad la xiriirtaa dhakhtarka, kalkaalisada ama farmashiyaha.

Sidee ayaan daawadayda u xafidan karaa?

Daawada oo sida ugu saxsan loo xifdiyo ama loo kaydiyo waxaa arrinkaas uu xaqiijinayaa, in awoodda daawada iyo ammaankeedaba ay sii jiraan illaa iyo maalinka ugu dambaysa ee daawada isticmaalkeedu uu jiro.

Tilmaanbixinta ku saabsan keydinta daawada waxaa ay ku qoran yihiin dhinaca baakadka daawada iyo warqadda warbixinta daawada ee baakadka ku jirta.

Xaggee ayaan ku xoorayaa daawada waqtigeedii dhacay ama aan loo baahnayn in mardambe la isticmaalo?

Ha isticmaalin daawada waqtigeedii uu dhacay

Daawada dhacday ama aadan mardambe u baahnayn inaad isticmaasho, waxaad gaysaa farmashiyaha (ha ku ridin qashinka caadiga ah).

Farmashiyaha ayaa si ammaan leh u xoorayaa daawada.

Akhri faahfaahin dheerad ah:

[Hagis ku saabsan daryeelka daaweynta ee ammaanka ah](#)
(oo luqadda Ingiriiska ah)



LUOTETTAVAN
LÄÄKETIEDON
PUOLESTA
Lääkeinformaatioverkosto